

KU SOO DHAWOOW MAKTABADDA

Somaliska

Maktabaddu dadka oo dhan ayey furan tahay.

Waa lacag la'aan in maktabadda la tago.

Kaarka maktabadda waxaa ku amaahan kartaa buugaag, oo waxaad ku isticmaali kartaa kombiyuutarada iyo internet.

Qof walbana waa uu samaysan karaa kaarka maktabadda.



Maktabadda waxaa yaal buugaag iyo wargeysyo ku qoran afaf kala duwan oo laga keenay dunida oo dhan.

Maktabadda wax ku akhriso ama guriga u amaaho. Waana lacag la'aan.

Waxaa halkaas yaal filimo, barogaraamada lagu cayaaro iyo cajlado.

Maktabadda waxaad ka isticmaali kartaa kombiyuutarada iyo internet. Waxaa halkaas laga helayaa internet wi-fi ah.

Maktabadda waxaad ka samaysan kartaa daabacaad, koobiyo iyo sawiraad.

Waxaa halkaas yaal buugaag carruur oo afaf badan ku qoran.



Waxaa ku yaal qolal la amaahdo.

Maktabaddu waa meel badanaaba xasilooni ka jirto. Waa okey in cabbaar la iska fariisto.

HALKAAN WAXAAD KA SAMAYSAN KARTAA KAARKA MAKTABADDA

1. Kaalay maktabadda oo la hadal shaqaalaha.
2. Tus kaarkaaga aqoonsiga. Kaarka maktabadda mar walba waa lagu sameynayaa xataa haddii aadan haysan kaar aqoonsi. Kaarkaas waxaa la isticmaali karaa saddex bilood.
3. Dooro koodka lagu galo (oo afar lambar ah)

Marka maktabadda booqaneyso sii qaado kaarka maktabadda.



Waxa aad maktabadda ka amaahato waxaad soo haysan kartaa hal ilaa laba toddobaad ama afar toddobaad. Waxyaalo badan ayaa dib loo amaahan karaa.

Waxaa muhiim ah inaad waqti ku soo celiso wixii aad amaahatay. Haddii kale waxaa dhici kara inaad bixiso khidmad. Kaarkaaga maktabaddana waa lagaa xannibi karaa.



Mar walba oo aad wax amaahato waxaa kuu soo baxaya risiid. Halkaasna waxaa ku qoran taariikhda aad soo celineyso waxa aad amaahatay.

Annaga ka shaqeynna maktabadda Waxaan ku faraxsanahay inaan kaaga jawaabno su'aalahaaga.



Maktabaddu waxay leedahay bar internet oo lagu magacaabo Minabibliotek.se Waxyaalaha halkaas laga akhrisan karo waxay ku qoran yihiin afka iswiidhishka.

Waxaad koonto ka furan kartaa minibibliotek.se si aad dib ugu amaahato waxyaalaha aad horay u amaahatay, aad buugaag u dalbato ama u amaahato buugaag elektarooniga ah. Waxaan jecelnahay inaad ku caawinno haddaad dooneyso.

KAARKA MAKTABADDA WAXAA LAGU ISTICMAALI KARAA MAKTABADAHAN

BJURHOLM

Maktabadda Bjurholm

NORDMALING

Maktabadda Nordmaling
Xarunta buugaagta Rundvik

ROBERTSFORS

Maktabadda Bygdeå
Maktabadda Robertsfors
Maktabadda Ånäset

UMEÅ

Baska buugaagta
Maktabadda Ersboda
Maktabadda Grubbe
Maktabadda Holmsund
Maktabadda Hörnefors
Maktabadda Mariehem

Maktabadda Obbola
Maktabadda Sävar
Maktabadda magaalada
Umeå

Maktabadda Teg
Maktabadda Umedalen
Maktabadda Ålidhem

VINDELN

Maktabadda Vindeln
Maktabadda Granö
Maktabadda Hällnäs
Maktabadda Tvärålund
Maktabadda Åmsele

VÄNNÄS

maktabadda Vännäs
Maktabadda Vännäsby

Maktabadda iigu dhow:

